

2022-23 Sanad Dugsiyeedka

Macluumaadka Diwaangelinta

Muddada Codsiga

Isniin, Noofembar 1, 2021 – Arbaco, Diseembar 15, 2021



Yaa u baahan inuu isdiwaangeliyo?

- ◆ Dhammaan ardayda ku cusub Degmada Jefferson County Public School (JCPS) waa inay isdiwaangeliyaan kahor intaanay codsan.
- ◆ Haddii ilmahaagu hadda ka diwaangashan yahay Carruurnimada Hore ama dugsi hoose, dhexe, ama dugsi sare, muhiim ma aha inaad mar kale isdiwaangeliso.

Yaa U Baahan Inuu Codsado?

Dugsiga Hoose

- ◆ Dhammaan ardayda dugsiga barbaarinta ee soo socota waxay u baahan yihiin inay is -diwaangeliyaan oo codsadaan.
- ◆ Ardayda dugsiga barbaarinta ee soo socota waa inay noqdaan 5 sano jir Ogosto 1, 2022.
- ◆ Ardayda danaynaysa dugsiyada magnetka ama barnaamijyada ikhtiyaariga ah/barnaamijyada magnet sanad dugsiyeedka 2022-23 waxay arjiga ku dooran karaan ilaa laba doorasho.

Dhexe

- ◆ Ardayda JCPS ee cusub iyo kuwa hadda jira ee danaynaya inay codsadaan dugsiyada magnetka, barnaamijyada magnetka, iyo/ama barnaamijyada ikhtiyaariga ah.

Ardayda JCPS ee hadda dhigta fasalka shanaad ee aan codsan, ama aan la aqbalin, dugsiga magnet ama barnaamijka magnet ayaa si toos ah loogu qori doonaa dugsiga deggan ee cinwaanka guriga ardayga (codsi looma baahna).

Sare

- ◆ Ardayda JCPS ee cusub iyo kuwa hadda jira ee danaynaya dugsiyada shabakadda (Tacliinta Louisville iyo Waddooyinka Xirfadaha), dugsiyada magnetka, iyo barnaamijyada magnetka.

Ardayda JCPS ee hadda dhigata fasalka siddeedaad ee aan codsan, ama aan la aqbalin, iskuul shabakad, iskuulka magnet, ama barnaamijka magnet ayaa si toos ah loogu qori doonaa dugsiga deggan ee cinwaanka guriga ardayga (codsi looma baahna).

Fiiro gaar ah: Ardayda dugsiga dhexe iyo sare ee ku cusub Degmada Jefferson ee doonaya inay dhigtaan dugsiga deganaanshaha cinwaankooda waa inay marka hore is -diwaangeliyaan ka dibna la xiriiraan dugsiga deganaanshaha si loo helo macluumaadka diwaangelinta (codsi looma baahna).

Macluumaad Muhiim ah iyo Siyaabaha Diwaangelinta iyo Codsiga

Onleenka

Qoysasku waxay iska diwaangelin karaan oo ka codsan karaan onleenka www.jeffersonkyschools.us ama waxay iska eegi karaan koodka QR ee hoose.



Waxa Aad U Baahan Doonto?

- ◆ Aqoonsi sawir
- ◆ Caddeynta cinwaanka hadda jira 30-kii maalmood ee la soo dhaafay (biilka korontada [LG&E/biyaha], heshiiska kirada, heshiiska guriyeynta, jeegga mushaharka, ama dukumintiga ay dawladdu soo saartay). Taariikhdu waa inay ka muuqataa dukumintiga.



Finder School

Si aad u hesho dugsiyo u adeega cinwaankaaga, booqo www.jefferson.kyschools.us. Guji Waalidiinta ka dibna Finder School.



Nala soo xiriir

Taleefan: (502) 485-6250
limayl:
askstudentassignment@jefferson.kyschools.us